

# Waalidiinta Feejignaan!

Waxaa dhici karta in Caruurta  
aad u Hesho Gargaarka  
Cuntada ee P-EBT

## Waa maxay P-EBT?

Barnaamijka Safmarka EBT (ama P-EBT) wuxuu fidiyaa kaalmo dhaqaale oo lagu bedellayo cuntada iskuulka ee ku dhaafay inta lagu jiray bishii Maarso, Abriil, iyo Maajo taas oo sababtay iskuulka la xiray sabab cudurka COVID-19 loo xiray darteed. P-EBT waxaa loo isticmaali karaa in dukaamada looga soo iibsado raashiinka guriga iyo in lagu soo iibsado dukaamada kale ee wax looga soo gadan karo kaarka EBT ga oo carruurtaada aad ugu soo iibin karo walxaha cuntada.

## Sida loogu Qalmo:

Waxaa dhici karta in qoyskaaga uu u qalmo haddii canugaaga(carruurtaada):

- Ay dugsiga ka helaan cunto bilaash ah ama qiimaheedu la dhimay ee loo soo mariyo Barnaamijka Qadada Iskuullada Qaranka AMA
- Ay dhigtaan iskuul Bulsho oo laga bixiyo cuntooyin bilaash ah oo la siiyo dhammaan ardayda oo dhan

## Sida loo Codsado ama loo buuxiyo:

Waxbadan ka baro  
adigoo booqda  
[tn.gov/humanservices](https://tn.gov/humanservices)

Sidoo kale waxaad iskaan ku samayn kartaa Summadan (QR Code) adigoo kaamarada telfoonkaaga isticmaala si aad u booqato bogga internetka ee Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee si aad wax badan uga barato oo aadna u codsato.

